

XARIIRADA QOYSKA GUURKA

GUURKA

Waxaad guursan kartaa keliya hal qof markiiba gudaha Ontario. Haddii aad qof kale ku qabto wadan kale ama gobal kale, waa inaad qofkaas soo furtaa kahor intaadan qof kale ku guursan Ontario si sharci ah.

Guurka dadka isku jinsiga ah sharci ayuu ka yahay Ontario iyo Canada oo dhan. Ontario ayaa aqoonsata guurka wadamada kale ee guurka dadka isku jinsiga ah sharci ka yahay.

Haddii adiga iyo lamaanahaagu aad wada nooshihiin laakiin iinaan is qabin waxaa la idiin aqoonsan karaa lamaane guud. Lamaane guud waa inay xariir lahaadaan in ka badan sadex sano, ama hal sano haddii ay ilmo isku dhalaan.

FURIINKA

Midkood labada lamaane ayaa codsan kara furiinka. Keliya maxkamad ayaa ku siin karta furiin, laakiin waxaad ku heshiin kartaan furiin adinka oo aan maxkamad idin dhex galin, dhexdhexaadin ama wada hadal aysan idiin qaban qareeno. Laamaneyaasha guud ee kala taga ayaa waajihi kara cilado sharci marka ay timaado hantida iyo masuuliyada ilmaha, marka waxaa fiican inaad talo caafimaad hesho.

RABSHADA MAXALIGA AH

Dhammaan noocyada rabshada jirka ee ka dhanka ah xaas, lamaane guud ama xubinaha kale oo qoyska ah waa sharci daro. Tan waxaa ku jira falka galmada uusan qofku doonayn. Ugu hanjabida inaad waxyeelayso ama dilayso qof ayaa sidoo kale danbi ah. Qof kasta oo lagu xukumo rabshada qoyska ayaa mari doona ciqaab xun, ayna ku jiro xabsi.

Haddii aad khatar ku jirto, wac 911 kadibna dalbo booliiska.

Haweenka xadgudubka kala kulma xubin qoyska ah ama qof kale ayaa wici kara

Laynka Gurmadka Haweenka La wareeraro

1-866-863-0511, 24 saac maalintii, 7 maalmood asbuucii. Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo awhl.org

Adeegyada qoyska ayaa lagu heli karaa 154 luuqadood.

XAD GUDUBKA ILMAHA

Xadgudubka ilmuhu waa nooc kasta oo xadgudub jireed, mid dareen iyo/ama mid galmo ama daryeel la'aan keentay dhaawac ama waxyeelo dareen oo ku dhacday ilmo ama qof dhalinyaro ah. Noocyada xadgudubka ilmaha iyo dhalinta waxaa ku jira xadgudubka dareenka, jirka ama galmada (taabasho ama aan taabsho ahayn), in hortoda lagu dagaalamo iyo dayacaad. Dayacaada ayaa lagu aqoonsan karaa ku fashilmida siinta hooy, cunto, dhar, waxbarasho, nadaafad wanaagsan, kormeer, daryeelka caafimaadka, nasiino ku filan, barbaarin wanaagsan, jimicsi, goob amaan ah iyo hawo nadiif ah.

Xog badan ka ogoow xadgudubka iyo dayacaada ilmaha justice.gc.ca or findlink.at/protechild

Si aad xog badan uga ogaato sharciga qoyska ee Ontario, ayna ku jiraan xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga, booqo Wasaarada Garyaqaanka Guud oo aad ka helayso attorneygeneral.jus.gov.on.ca ama findlink.at/on-famlaw

Si aad u hesho xog ku saabsan xuquuqda haweenka ee sharciga qoyska ee Ontario, booqo Waxbarashada Sharciga Qoyska ee Haweenka oo aad ka helayso onefamilylaw.ca

Si aad u hesho caawimaada dhibaneyaasha galmada ama rabshada qoyska, booqo Agaasinka Haweenka Ontario oo aad ka helayso women.gov.on.ca ama findlink.at/serviwomen

Si aad xog badan uga hesho adeegyada dhimaha, booqo attorneygeneral.jus.gov.on.ca ama findlink.at/ovs

